



Isbedelada Muhiimka ah ee Saameynaya RGI

Laga bilaabo Julaay 1, 2021, xubin kasta oo reerkaaga ka mid ah waa inay xaraysaa Soo Celinta Canshuurta Dakhliga si ay ugu qalanto inay hesho gargaarka RGI.

Sannad kasta, laga bilaabo Julaay 1, 2021, dhammaan xubnaha reerka ee dakhligooda lagu darayo xisaabinta RGI waxaa ku waajib ah:

- 1. inay xarayso Soo Celinta Canshuurta Dakhliga; iyo**
- 2. inay u gudbiso adeeg bixiyaha guryahooda ogeysiiska qiimeynta waqtiga la sameynayo dib u eegista dakhligooda sanadlaha ah iyo hantidooda.**

Gobolka Ontaariyo wuxuu dhowaan bedelay shuruudaha *Xeerka Adeegyada Guriyeynta, 2011*. sidaas darteed, waa inaad xareysaa canshuur celinta si aad xaq ugu yeelatid RGI.

Ogeysiiska Qiimeynta waa dhukumintiga ama warqada ay Wakaaladda Canshuuraha Kanada kuu soo dirto ka dib marka la xareeyo oo la caddeeyo soo celinta canshuurta dakhligaaga.

Macluumaadka ku saabsan goobaha caawinta canshuuraha ee bilaashka ah, booqo:

<https://www.canada.ca/en/revenueagency/services/tax/individuals/community-volunteer-income-tax-program/need-a-handcomplete-your-tax-Return.html#whatfree>

Waqtiga kama dambaysta ah ee dadka reer Kanada badankooda ay tahay inay soo xareeyaan Soo Celinta Canshuurta Dakhliga ee sanadkii 2020 waa Abriil 30, 2021.